

Xilliga RS ayaa la joogaa



Hadda tiro aan caadi ahayn oo caruur ah ayaa xannuunka qaaday. Caruurta da'doodu ka yartahay hal sano xoog ayay ugu bukoon karaan caabuqa RS kaasoo u keenaaya dhibaato xagga neefsashada ah oo u baahan daryeel dhaqatar. Sidaa daraadeed waxaa muhiim ah in la xaddido ku fiditaanka caabuqa caruurta yar yar dhexdooda.

Fayraska RS wuxuu ku fidaa marka qof ku qufaco ama ku hindhiso qof kale. Waxaa kale oo lagu kal qaadi karaa gacmaha iyo sanko. Si kastaba ha ahaatee fayruska kuma faafo dhinaca hawada, caanaha naaska ama cuntada.

- Ka taxadar nadaafada, gacmaha dhaq mar walba ama isticmaal aalkolada gacmaha.

Tallaabooyin dheeri ah oo lagu ilaalinaayo caruurta yar.

Waxaad hoos u dhigi kartaa halista faafitaanka caabuqa oo aad ka ilaaliso caruurta aadka u yar iyadoo:

- Laga fogaado dadka hargabsan.
- La dooranaayo dhaqdhaqaaqyada guriga dibadiisa ah.
- Laga fogaado in la tago meelaha dadka ku badanyihiin.
- Ka fikir in ilmaha waaweyn ee la dhashay ilmo ka yar lix bilood aysan aadin xannaanada marka faafitaanku gaaro heerkii ugu sareeyay.

Fadlan la hadal shaqaalaha BVC haddii aad su'aalo qabto ama wax badan oo ku saabsan fayraska RS ka aqriso shabakada hagaha daryeelka 1177.

/xarunta dhexe ee daryeelka caafimaadka caruurta